
2025

# AQOONSI-BEENAADKA ISRAA'IIL

**Faham guud, Saamaynta uu ku yeelan karo Dalka, iyo Talooyin ku Wajahan Sida Soomaaliya ay uga Guulaysan Karto Faragelinta Shisheeye**




By: Yusuf Osman

yuu.osman1@gmail.com

## *Aqoonsi beenaadka Israa'iil*

### *Faham guud, saamaynta uu ku yeelan karo dalka, Iyo talooyin ku wajahan sida soomaaliya ay uga guulaysan karto faragelinta shisheeye.*

### *1.Faham Guud*

Tallaabada israa'iil ee ah sheegashada aqoonsi ee Somaliland , sharci ahaan waa mid aad u liidata, sababtoo ah lama marinin knesset-ka Israa'iil (Israel's Parliament),lamana waafajin xeerarka qaramada midoobay, taas oo ka dhigan in israa'iil aysan aqoonsi buuxa ka haysanin Caalamka.

siyaasad ahaan waa kicin colaadeed oo ujeedkeedu yahay kala qoqobidda Soomaaliya Iyo in la helo marin isteraatiigi ah (Badda Cas & Gacnka Cadmeed).

Sidaasi darteed, shacabka Iyo dowladu waa in ay sidaas u fahmaan, oo ay xusuusnaadaan "Aqoonsi-beenaakda Israa'iil", oo looga jawaabaa si maskax iyo Dulqaad leh, Iyo qorshe aan ku dhisnayn “caro, caadifad iyo hadal kulul oo dhaawacaya diblomaasiyadda Soomaaliya.

Waxay u baahantahay farsamo caalami ah iyo in la adeegsado, sumcadda diblomaasiyadeed ee adduunku uu u hayo Soomaaliya, iyo guud ahaan akhlaaqda siyaasadeed (the Ethics of politics)

### *2. Saamaynta uu Aqoonsi-Beenaadku ku yeelan karo Soomaliya*

Aqoonsi-Beenaadku, ma ahan wax sahlan, waliba midka ay bixiyeen Dowlad-beenaadka Israa'iil wuxuu ku yeelan karaa Soomaaliya saamayn siyaasadeed, mid amni, Iyo mid bulsho oo halis ku ah Dowladda soomaaliya iyo guud ahaan goloblka. maadama uu dhaawacayo midnimada ummada Soomaaliyeed, taas oo saamayn ku sii yeelan doonta geeska Afrika Iyo guud ahaan caalamk.

Tallaabada noocan ah waxay dhiiriglin kartaa oo ay fursad siin kartaa quwado kale oo shisheeye, kuwaas oo dano gaar ah ka leh dalka Soomaaliya, iyo kuwa kale oo ah “la shaqeeyayaal Gumaysi ama Cadow”(collaborators ) , amaba ah Khaa’inul wadan (traitors), amd kuwa kale oo ah “Tiirka Shanaad” (Fifth Column-cadow kula dhashay, balse u adeega shisheye)

sidoo kale Aqoonsi-Beenaadku wuxuu abuuri karaa jawwi qalalaase, oo horseeda loollan siyaasadeed, xassillooni darro Amni, Iyo daciifinta mowqfika Soomaaliya ee fagaarayaasha caalamiga ah, taas oo si toos ah u samayan karta dadaallada dib-udhiska nabadda Iyo Doowlad-dhiska soomaaliya. sida lagu muujiyay buugaag cilmiyeed Iyo warbixinno caalaami ah. Aqoonsi-Beenaadku inta badan wuxuu ka dhashaa dano shisheege oo ka faa'ideysta khilaafka gudaha dalalka nugul.

khibradda dalal badan ayaa muujineysa in faragelinta shisheeye ay si fudud u guuleysato marka uu jiro kala shaki, is-aaminid la'aan yo xiriir xumo u dhexeysa dowladda, Dowlad-gobaleedyada Iyo shacabka. marka talada dalka lagu maamulo qaab aan degganayn, isla markaana ay jirto is-quursi siyaasadeen, eex ama dulmi loo arko nidaam, shacabku wuxuu luminayaa kalsoonidii uu ku qabay dowladdiisa, taas oo bedelkeeda quwado shisheeye ay fursad u helayaan in ay isku muujiyaan "Xal" ama "Garab", iyadoo ujeeddooyinkoodu inta badan yihiin dano isteraajiyadeed oo iyaga u gaar ah, kana fog danaha qaranka.

Tusaale cad waxaa noogu filan Dowladda aan deriska nahay ee "Itoobiya" oo uu ka jiro khilaaf gudaha ah, wada noolaasho-la'aan-siyaasadeed, Iyo awood ku dhisan ciidan taas oo keentay in dalku galo xaalada u nuglaasho (gacma shiisheeye), maadaama aysan jirin shacad iyo dowlad si degan isku aaminsan, sidoo kale waxaa furmay albaabo ay quwada shisheeye awood u siinaya in ay soo farageliyaan maamulka dowladda ayagoo sheeganaya in ay doonayaan in ay khilaafka maareeynayaan, balse ujeedkuudu yahay dano kale, taas sababi karta kala fogaansho bulsho, bubur dhaqaale, Iyo halis ku tilaamda midnimada dalka.

Taas waa cashar laga baranayo marka la waayo wada tashi, caddalad, Iyo is-qaddarin -siyaasadeed, faragelinta shisheeyana ay noqoto natiijo dabiici ah oo dalal badan ay ku kala go'een. Sida ay muujinayaa warbixinno ay soo saareen hay'adha caalamiga ah sida international crisis Group Iyo Qaramada midoobay.

Dalal kale oo tusaale u ah in khilaafka dowladeed ee gudaha uu sabab u noqon karo faragelin shesheeye oo aan la mahadin waxaa ka mid ah:

**Suudaan** oo kala qaybsan siyaasad ahaan Iyo millateri ahaan, taas oo u horeseeday kala go' Iyo faragelin caalami ah.

**Liibya** oo ay dowladii dhexe ka burburtay , dhinacyo ilaa hadda ay iska soo horjeeda, quwado shisheey oo maamulo dhinacyada iska soo horjeeda.

**Koonfurta** Suudaa, oo nafteeda is-aaminid la'aan hogaamineed ay ka jirto, sidaas darteedna ay ku tiirsanyihiin xoogag shisheeye.

**Suuriya** oo khilaafkoodi gudahaa uu isku bedelay loollan siyaasadeed oo caalami ah, oo ay suurtogal tahay in ay kala go'do ama ay ku jiraan tiih siyaasadeed

**Yemen** oo iyaduna khilaafkeeda gudaha uu gaaray ilaa heer calami oo quwado shisheeye ay ku loolamayaan.

**Ciraaq** oo iyaduna kala qaybsanaan siyaasadeen oo aan jiha lahayn, saamaynta gacmaha shisheeye oo aan xad lahayn

aaway **afgaanistaantii** faragelinta shisheeye ku dhamaantay, dowlad iyo shacab is aaminsanayn iyo faragelin daba dheeraatay.

***3. Talooyinka siyaasadeed ee an bixinayo si gacmaha shisheeye ay nooga yaraadaan waa:***

1 ***Dowladdu way in ay bedeshaa Luuqadda ay kula hadasho dowlad-gobaleedyada oo ay ku jirto Somaliland***

dowladu wa in aysan ku hadlin hanjabaad, cagajuglayn, eedeyn dadwayne, oo ay ku hadashaa:

1. wax ay kala mudanyihiin walaalo soomaaliyeed oo waafaqsan hidaha iyo dhaqanka soomaaliyeed
2. waa in ay muujisaa qarannimo iyo in wadajirka Somaaliyeed ay muhiim u yihiin Dowlad gobaleedyada, gaar ahaan Somaliland
3. dowladu waa in ay Somaland u furtaa albaab wadahadal oo fudud si ay uga saarto go'doonka iyo colaadda dabada dheeraatay oo ay dareemayaan.

4. waa in dowladdu u dirtaa ergooyin aamin ah, Soomaliland, Dowlad-goboleedyada ay u tegi kartana ay si toos ah ugu tagtaa)

**2** *Talada kale waa in xal loo helaa khilaafka iyo kala qaybsanaanta gudaha ah*

Hogaamiyaha qaranka waa in uu ka shaqeeyaa midaynta bulshada Soomaaliyeed oo uusan ka shaqeynin in ay dadku kala irdhoobaan, madaxwaynaha talada aan siinayo waxa ay tahay, maadaama uu yahay madaxwayne mar labaad loo doortay hogaanka dalka, maadaama uu leehaya waayo aragnimo caalaimi ah, iyo sumcad diblomaasiyadeed,waa in uu ka dhigaa qaddiyadda faragelinta israa'iil , Arrin qaran, oo uusan ka dhigin arrin kooxeed ama mid xisbi ama mid gobaleed, siduu uga dhigayaa? waa in uu isugu yeeraa dhamman dowlad-goboleedyada, Siyaasiyiinta Mucaaradka, Ururrada Bulshada, ururrada siyaasadda, Aqoonyannnada, Ganacsatada, culumada iyo waxgaradka kale, si loo dareemo isbedel iyo qadiyadu in ay tahay mid qaran. "Tanaasulku ma ahan ceeb, ee waa arrin islaami ah iyo xeelad siyaasadeed."

**3** *Talada 3aad waa in dowladu si xooggan ay uga shaqeysaa in reer koonfur oo dhan ay doonaan walaalaha Somaliland oo ay garowshiyo ka bixiyaan, wax kasta oo ay sheeganayaan.*

Dowladda Federalka soomaliya waa in si qorshaysan uga shaqeysaa in dhamman bulshada Soomaaliyeed ee ku nool Koonfurta ay si midaysan u muujiyaan rabitaan, walaaltinimo, iyo garab-istaagga ay u hayaan walaalaha waqooyi ee Somaliland, iyaga oo si cad garowshiyo uga bixinaya, tabashada ay ka qabaan dowladdii millatariga iyo kuwii ka dambeeyay.

Waa in la xaqiijiyo in xuquuqdii ay lahaayeen si buuxda loogu soo celiyo, sidii lagu heshiiyay xilligii ay go'aansadeen in ay la middoobaan soomalia.

Waa in dowladu ogaataa in Somaliland hadii la go'doomiyo siyaasad ahaan ay u carari doonto Israa'iil,hadiise la soo jiito , iyadoo la siisnayo xaqeedii iyo walaaltinnimo, Israa'iil waa laga hor-istaagi Faragelinteeda; sidaasi darteed waxaa lagama maarmaan ah in diiradda la saaro qodobbadaan:

1. in Somaliland la siiyo maqam Sharaf leh si loo xaqiijiyo wada tashi ku dhisan is-ixtiraam, iyo isudheelitir siyaasadeed
2. waa in wada hadalku noqdaa mid joogto ah oo wax dhisa , si loo helo kalsooni siyaasadeed iyo Isfahan waara .
3. waa in la qiraa oo loo sheegaa bulshada, lana dareensiiyaa, qadiyadda Somaliland in ay tahay qaddiyad Soomaaliyeed, oo aysan ahayn qadiyad Gobol, mid israa'iil iyo mid quwado shisheeye.

---

“Waa in la ogaadaa khilaafka gudaha ah,
in uu keenayo in dalku kala go’o, shisheeyuhuna uu ka faa’iideysto”

---

*FG: Qormadan waxay ka tarjumaysaa aragtida qoraaga, mana ahan, mowqif rasmi aha oo ka tarjumaya hay’ad ama cid gaar ah.*

By: Yusuf Osman
Yuu.osman1@gmail.com